EXPANDING ACCESS TO JUSTICE

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada
Taxanaha Daraasadda Aqoonyahannada EAJ

Tirsiga 1
Juulaay 2020

TACADIYADA KU DHACA DADKA LA HAYB-SOOCO

Maxamuud Saleeban Cabdillaahi

USAID KA TIMID DADWAYNAHA MARAYKANKA
BALAADHINTA ADEEGYADA MARIN-UHELIDA CADAALADA
pact building local promise.
ABA AMERICAN BAR ASSOCIATION Rule of Law Initiative

Ku saabsan:

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada (EAJ) Taxanaha Cilmi Baadhista waxay dhiirigelisaa isweydaarsiga fikradaha ku saabsan caddaaladda gudaha Soomaaliya waxayna faafiyaan natiijooyinka baaritaanka. Qorayaashu waa aqoonyahanno gaar ah oo ka kala socda Somaliland, Puntland, iyo Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya.

Afeef:

Warbixintaan waxaa lagu soo saaray taageero laga helay Dadka Mareykanka iyada oo loo sii marinayo Hayada Mareykanka ee Horumarinta Caalamiga (USAID) oo hoos timaad Nidaamka Taageerada Xuquuqda Aadanaha (HRSM). HRSM waa hay›ad ay maalgaliso hay›adda USAID, waana hoggaamiye shan sano ah oo ay weheliyaan heshiis iskaashi oo ay fulinayaan hay›adda ‹Freedom House› ee uu hoggaamiyo «Badbaadinta Xuquuqda Caalamiga ah iyada oo loo marayo Isku-xirka Joogtada ah» (PROGRESS). Waxyaabaha ku jira ayaa mas›uul ka ah Heshiiska mana ahan inay ka turjumaan aragtida USAID ama Dowladda Mareykanka.

Lagala xiriiri:

Anton Pestana
EAJ Madaxa Hawlgalka qeybta
Pact Kenya
Nayroobi, Kenya
+254-712-232-200
apestana@pactworld.org

Nayroobi, Juulaay 2020

Tusmada

1. MAHADNAQ....4
2. ERAYO LA SOO GAABIYAY....5
3. HORDHAC....6
4. TACADIYADA IYO DHIBTA AY LA KULMAAN DADKA LA HAYB-SOOCO....7
5. TILMAAMIDA DHIBTA....7
6. HANAANKA LOO MARAY CILMI-BAADHISTAN....8
7. GOLAHA CILMI-BAADHISTA....8
8. SHURUUCDA CAALAMIGA AH....8
9. SHURUUCDA MAXALIGA AH (SOMALILAND)....9
10. WAAYAHA DADKA LA HAYB-SOOCO....9
11. SABABAHA KEENAY HAYB-SOOCA....10
12. TALLO SOO JEEDIN....13
13. WACYIGALIN 13
14. GUNNAANAD....14
15. TIXRAAC....15

Mahadnaq

Ugu Horeyn waxaa mahad oo dhan iska leh ALLE (SWT) ii suura geliyay innaan dhammeystiro cilmi-baadhistan, marka labaad waxaan u mahad celinayaa hay'adda Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada (EAJ) oo iska lahayd maal gelinta qaabkii loo heli lahaa xogtan, dhiirigalisayna dhallinyarada si ay u helaan xaqiiqooyinka runta ah ee jira.

Waxaa kale oo aan aad iyo aad ugu mahadcelinayaa ka qeyb galayaashii ka qeyb galay daraasadan waqtigoodana geliyay muddadii ay socotay cilmi-baadhistani. Waxa kale oo aanan marnaba illaawi doonin inaan u mahad celiyo masuuliyiinta deggen xaafadda DAAMI ee naga caawiyay inaan qaadno waraysiyo toos ah iyo xog isla markaana noo suurageliyay inaan la kulano dhibanayaasha qaarkood.

ERAYADA LA SOO GAABSHAY

FGDS	Dood Kooxeed
UDHR	Baaqa Caalamiga ah ee xuquuqal Insaanka
XCG	Xeerka Ciqaabta Guud
DSL	Dastuurka Somaliland
TCD	Tacadiga

Hordhac

Bulshada la hayb-sooca waa bulsho ku dhaqan guud ahaan deggaanada ay deggen yihiin dadka afsomaaliga ku hadlaa, Waa bulsho la nool tacadiyo iyo dhibaatooyiin dhaqan. Haddaba si loo ogaado dhibtan dhaqan ee ay la nool yihiin bulshadan la hayb-soocaa waa in la sameeyo cilmi- baadhis qoto-dheer lana abla-ableeyo duruufaha ay la nool yihiin bulshadani.
Cilmi-Baadhistani waxay daaha ka rogaysaa xaqiiqada dhabta ah oo ay ku sugan yihiin bulshadan. Waxa hawshan isku xilqaamay oo u guntaday sidii loo ogaan lahaa dhibtan maalgalisayna **Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada (EAJ)**, loogana dan lahaa tacadiyada ka dhanka ah ee hayb-sooca.

Waxaa hagayay Cilmi-Baadhistan su'aalo dhawr ah :

1. Maxaa u sabab ah tacadiyada ka dhanka ah Hayb-Sooca?
2. Noocyada Tacadiyada ee jira
3. Helida Adeegga Cadaaladdeed

Muhiimada ay laheyd daraasadani waxay aheyd in lagu baraarujiyo bulshada qeybeheeda kala duwan tacadiyada ka dhanka ah, guud ahaan hayb-sooca iyo qaabkii loo heli lahaa xaqiiqooyinka dhabta ah ee jira. Sidoo kale ujeedada daraasadani ay tahay in loo adeegsado xogtan la helay si ay u taageeraan isbadalada barnaamijyada lagu horumarinayo sharciyada, siyaasadda iyo awooddaha dawladnimada ee ku aadan tacadiyada ka dhanka ah guud ahaan hayb-sooca.

Habka loo maray soo ururinta xogta waa habka tayada (qualitative method) oo ay ku jiraan waraysiyo keli keli ah iyo waraysiyo kooxeedyo, waxay ka dhaceen afar goobood oo ka mid ah gobolka Maroodi jeex gaar ahaan degmada Hargeysa. Xogtan waxaan isku soo ururiyay Bishii Disembar ee sanadkii 2019 illaa Bilowgii Febarweri 2020, waxaana ka qeyb qaatay 12 qof oo isugu jira bulshada qeybaheeda kala duwan.

Sida ay hoosta ka xariiqeen ka qeyb galayaasha cilmi-baadhistu, tacadiyo aad u badan oo ka dhan ah dadka la hayb-sooco ayaa ka jira guud ahaan Somaliland . Tacadiyada lagula kacay dadka la hayb-sooco, waxa ka mid ah jidh dil, bahdilaad, hanjabaad iyo, dil intaba.

Tacadiyadani waxay gaar u yihiin dadka la hayb-sooco, isla markaa waxaanu ku ogaanay cilmi- baadhistan inay gaar u tahay hayb-sooco dadka la hayb-soocay ee ku nool guud ahaan Somaliland gaar ahaan Hargaysa.

Waxaa kale oo ay timamaysaa cilmi-baadhistani, tacadiyada ka dhanka ah Hayb-sooca ee si guud loogula kaco dadka la hayb-sooco ee salka ku haya hayb-sooca oo ay bulshadan sida dhabta ah u taabtay taas oo la rabo in laga xakameeyo, isla markaana laga hortago tacadiga ka dhanka ah hayb-sooca.

Haddaba, si loo dhiso kalsoonida dadka la hayb-sooco waxa lagama maarmaan ah inay arkaan dad u guntaday isla markaana maalgalinaya waqtina ku bixinaya cilmi-baadhista lagaga waramayo xogaha daahsoon, si daaha looga rogo dhibta uu ku hayo tacadiga ka dhanka ah hayb-sooca iyo qeybihiisa kala duwan ee ay ugu weyn tahay, is dhexgalka guurka ee ku saleysan dhaqanka soo jireenka ah ee ka soo horjeeda diinta islaamka iyo cadaalada ijtimaaciga ah, waana in la baadi goobaa dhaqaale wax lagaga qabanayo si looga hortago tacadiga hayb-sooc, sidoo kale waa in la helaa lanna ansixiyaa xeerar xakamaynaya hayb-sooca, si looga waantoobo loogana dheeraado nooc kasta oo ka mid ah hayb-sooca, sida karaamada sharafta bulshada hayb-soocu ku dhacay.

TACADIYADA IYO DHIBTA AY LA KULMAAN DADKA LA HAYB-SOOCO

Dadka la hayb-sooco waa dad degen dhulka soomaalidu degto, waa dadka ugu waxtarka badan bulshada somaaliyeed. Bulshadan soomaaliyeed waxa ay isugu jirtaa saddex qaybood oo kala ah, Xoolo-dhaqato, Dhuul-maal iyo Midigmaal (Farsamo-yaqaan). Taariikhaha guunka ahi waxa ay tibaaxayan in bulshadani soo martay boqortoyin kala duwan sida Boqortooyadii BAYDARI, Boqortooyadii BOON iyo Boqortooyadii BUCUR-BACEYR.

Haddaba, taariikhahaan markaan kasoo tagno beelaha la hayb-sooc oo ahaa beelaha ugu tirada badan Soomaalida ayaa waxa intooda badan ku dhammaadeen colaadihii Oromada iyo Soomaalida xiliga oo ay aheyd xilli Oromada intooda badan ay duulaan ku soo aheyd dhulka ay degto Soomaalida, maadama Oromadu ay ahaayeen Boqortooyo mar walba daneyn jiray la wareegida xukunka geeska Afrika.

Kadib dagaaladaasi, waxa si la yaab leh dhulalka qaar iska guuray dadka la hayb-sooco iyaga oo eegaya inay goobo gaar ah isugu tagaan balse ay arrinkii noqday in magaalooyinka ay deganaayen ay iskaga wadadurkeen hadba sidii loogu soo durkayay ugu danbeyntiina ay halkaasi ku noqotay arrinka in lagu dhexmilmo kadibna gumaysi dadban iyo mid muuqda lagula tacaalay, taasoo intabadan la diidanaba in taariikhdooda muga weyn aysan ku faanin. Xiliyadan aynu maanta ku jirno beelaha la hayb-sooco waxay ka mid yihiin beelaha ugu xalaal miiradsan madam oo ay xoogooda ku shaqaystaan.

Inkastaoo ay jiraan taariikh badan oo aan la dafiri karin, balse xilli kasta Soomaalida ayaa ku dhisneyd in kuwii taarikhda lahaa ay noqdeen kuwo taariikhdooda[1] la tirtiro kuwa taariikhdooda lagu qabsado iyo kuwa taariikhaan wax raad ah laheyn iska sameysta sida hadda muuqata waligeedna dhici jirtay taasoo damac uu yahay in ummad dhan dhaqankooda la qabsado iyo jiritaankooda si kan wax dulmayana uu ku shirtago wax uu gacantiisa ku dhoodhoobay.

Hayb-soocu waa dhibaato aad u weyn oo lagula kaco beelahan, diinta islaamku ma oggolla in la is hayb-sooco waxaanay si toos ah u mamnuucaysaa nooc kastaoo ah hayb-sooc, waxaanay dhiirigalinaysaa in dadka oo dhan ay siman yihiin, diinta islaamkanu waxay dhiirigalinaysaa sinaanta dadka islaamka ah waxaanay meesha ka saaraysaa kala saraynta ummada haysata diinta Islaamka.

TILMAAMIDA DHIBTA

Dadka la hayb-sooco ee ku nool caalamka dushiisa waxaa ku dhacay tacadiyo kala duwan oo aan kala joogsi laheyn oo lagu hayay muddo aad u dheer, waxa kale oo la soo daristay tacadiyo aan kala joogsi laheyn, oo ay sabab u tahay hanaanka ay u qaabaysan tahay bulshadu iyo dhaqanka muddo badan soo jiray oo u qaabaysnaa kala saraynta ku saleysan takoorka lagu hayo bulshadan dadka la hayb-soocaa waxay sheegaan in lagu hayo dhibaatooyin dhanka nolosha, waxaana xusid mudan inay jirto sinaan darro. Doorka bulshadada ee dadka la hayb-sooco xaga dhaqaalaha, waxbarashada iyo ka qeybgalka siyaasadda, dadka la hayb-sooco waxaa dhib joogto ah ku haaya bulshada inteeda kale . Waxaa kale oo jirta in dadka la hayb-sooca aanay helin adeeg cadaaladeed oo hufan oo ka ag dhaw goobaha ay degen yihiin.

1 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb-Sooco

HANAANKA LOO MARAY CILMI-BAADHISTAN

Habbka loo maray soo ururinta xogtan waa habka tayada (qualitative methods) oo ay ku dhex jiraan waraysiyo shaqsi ah oo si toos ah aan ulla yeeshay dadka la hayb-sooco ee dhibtu ka soo gaadhay. Qaabka labaad ee aan u maray cilmi-baadhistani waa dood dhex martay koox (FGD) oo ujeedkiisu ahaa inaan wax ka ogaado fikrada ay ka qeybgalayaashu xaaladaha tacadiga ka dhanka ah dadka la hayb-sooco, isla markaana waxa qeyb ka ah hanaankaan u maray cilmi-baadhista xog ururinta waraysiyada gaarka ah ee dadka xogogaalka ah ee isla markaana aqoonta dheeriga ah u leh ee og dhibaatada uu leeyahay hayb-sooca.

GOLAHA CILMI-BAADHISTA

Cilmi-baadhistan waxa ay ka kooban tahay oo keliya tacadiyada ku dhaca dadka la hayb-sooco, inkasta oo ay dadka la hayb-soocaa si guud ay la kulmaan tacadiyo kala duwan oo xaga dhaqanka ah.

SHURUUCDA CAALAMIGA AH

Guud ahaan dadka la hayb-soocaa waa dad ay soowaajahaan duruufo nololeed aad u adag, waxaanay isugu jiraan dad waaweyn, dhalinyaro iyo caruur, waxaanay dadkani degen yihiin dhulka afsoomaaliga lagaga hadlo, waxaa xusid mudan in dadkan la hayb-soocaa ay leeyihiin xuquuq dastuuri ah iyo xeerarka dalka u yaala. Dadkaan la hayb-soocaa ma aha dad ka yimid dalal kale, hase ahaatee, waxa lagu hayb-soocaa wadanka ay ku nool yihiin ee Somaliland, waxaana jirta in ay waajahaan xadgudubyo waaweyn oo ay ka mid yihiin dhaqaale xumo iyo faquuq kaga yimaada dadyawga kale ee ka dhan ah xuquuqda aadamaha.

Wadanka Somaliland, isaga oo ixtiraamaya xuquuqda aadamaha waxay dib u eegtay hab raaca siyaasiga ah ee ku qotoma shuruucda caalamiga ah iyo mabaadiida Qaramada Midoobay, kuwaas oo si cad u sheegaya inay mamnuuc tahay in muwaadiniinta lagu kala saaro qabiilka ay ka soo jeedaan waxaanay taasi macno weyn u samaysay beesha caalamka oo ku soo dhiiratay in ay u kuur galaan xaaladaha ay ku sugan yihiin beelaha la hayb-soocaa iyagoo booqday meelaha ugu badan ee ay ka degaan Somaliland, isla markaana balan qaaday inay codkooda gaadhsiinayaan caalamka intiisa badan, cod dheerna ku sheegi doonaan baahiyaha ay qabaan dadka la hayb-soocaa, kana qeyb ahaan doonaan mucaawinooyinka la soo gaadhsiinayo beelahan la hayb-sooco. Sidaa darteed, nidaamka siyaasiga ah ee lagu jihaynayo dadka la hayb- sooco waxa saldhig u ah: shareecada, dastuurka iyo dhaqanka iyo shuruucda kale.[2]

Shuruucda lagu ilaalinayo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay waxa sal u ah axdiga qaramada midoobay, Afrika, taageerida iyo illaalinta dadka la hayb-sooco iyo dhammaan shruucda kale ee caalamiga ah, kuwaas oo inagu waajibinaya taageerida iyo taakulaynta dadka laga tirada badan yahay, in kasta oo aanay dawladaha ku aheyn waa waajib qaanuuni ah (Mandatory legal enforceable), balse raad raac ina tusaya illaalinta iyo xaqdhawrka dadyawga la hayb-sooco wadanka Somaliland waxa uu ka mid yahay wadamada aduunka, waxaanay dhawrasaa isla markaana ku dhaqmaysaa Axdiyada Qaramada Midoobay iyo qanuunnada dawliga ah, waxa kale oo ay xaq dhawrasaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga UDHR iyo heshiisyada kale ee lagu mamnuucayo nooc kasta oo hayb-sooc ah.

2 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb-Sooco

SHURUUCDA MAXALIGA AH (Somaliland)

Wadanka Somaliland waxa uu ka mid yahay dawladaha ugu Nabdoon Geeska Africa, dadka ku noolina ay haystaan Diinta islaamka kuna adag diintooda , waxaase jirta inaanay meesha ka saartay takoorka iyo hayb-sooca nooc kasta leh ee lagula kacayo bulshada la takooray sidoo kale dhaqanka ayaa ah midka uu salka ku hayo takoorka bulshadan . Taasi oo ku xusan sharciyada maxaliga ah ee Somaliland u yaala ee uu Dastuurku u sareeyo meesha kama saarayo hayb-sooca mana iftiiminayo xaqa ay ku leeyihiin bulshada ay la nool yihiin dadka la hayb-soocayaa.

Dastuurka Somaliland **Qodobkiisa 8aad** waxa uu si cad uga waramayaa sinaanta muwaadiniinta iyaga oo aan lagu kala saareyn midabka, qabiilka dhalashada luqada, lab iyo dhedig mudnaanta afkaarta iwm, waxay sharciga hortiisa ku leeyihiin waajibaad iyo xuquuq siman.

Dastuurka Somaliland **Qod 10aad** waxa uu si qoto dheer u qeexaya in Jamhuuriyada Somaliland ay aqoonsan tahay, isla markaana ku dhaqmayso Axdiyada Qaramada Midoobay isla markaana waxa ay xurmaynaysaa baaqa caalamiga ah ee Qaramada Midoobay, taas oo ujeedkeedu yahay in la ilaaliyo xuquuqda aadamaha lanna xakameeyo wax kasta oo dhaawacaya xuquuqda aadamaha.

Dhawrista xuquuqda aadamuhu si guud iyo si gaar ahaaneedba waxa xil weyn iska saaray qaranka Somaliland iyada oo dhawrasa baaqyada iyo heshiisyada caalamiga ah sida ku cad dastuurka Somaliland, qodobada ka hadla xuquuqaha muwaadinka waxa ka mid ah qodobka 8aad oo ka warama sinaanta muwaadiniinta, waxaanu odhanayaa sidan:
Muwaadiniinta Somaliland iyada oo aan lagu kala saarayn midabka, qabiilka, dhalashada, luuqada, lab, dhedig, hantida, mudnaanta, afkaarta iwm, waxay u siman yihiin sharciga hortiisa.

Waxa kale oo uu dastuurka Somaliland si cad u damaanad qaadayaa inay muwaadiniintu dhammaantood siman yihiin wax lagu kala saarayaana aanay jirin. Dastuurka oo ah xeerka wadanka Somaliland ugu sareeya xeerarka oo dhana isaga laga soo xigto.

Waxa aan jirin xeerar si cad u mamnuucaya ama ka hortagaya tacadiyada ka dhanka ah hayb- sooca lagu haya bulshadan ee dhaqanka ku salaysan oo lagu dabaqayo cid kasta oo ku kacda falalka hayb-sooca, hase ahaatee, xeerka ciqaabta guud waxa ku jira qodobo dhawr ah oo ka waramaya dambiyada lidka ku ah sharafta.

Ma jiraan xeerar si toos ah u mamnuucaya hayb-sooca oo ciqaab uu kala kulmayo qof kasta oo waxyeeleeya sumcad iyo sharaf qof kale, taasaana ka mid ah sababaha loogu dhiirado hayb- sooca waayo waxa aan jirin wax ciqaab ah oo lagala kulmayo haddii ay dhacdo in la sameeyo hayb-sooc.
Nasiib darada ugu weyn ee jirtaa, waa in aan la adeegan ama aan lagu dabaqin qodobada sumcada iyo karaamada qofka ilaalinaya haddii la dabaqi lahaana waxa iman laheyd in la arko iyada oo cid lagu ciqaabayo sharaf iyo karaamo qof lahaa oo uu hoos u dhigay isla markaana ku xad gudbay.

XAALADAHA DADKA LA HAYB-SOOCO

Xaaladaha tacadi ee ku salaysan hayb-sooca, waxa uu soo haystay bulsho ku dhaqan Somaliland, kiisaskan waxa ka mid ah is dhex galka guurka oo ah caqabadda ugu weyn ee ka haysata bulshada la hayb-sooco inay guursadaan, bulshada kale ee ay ku dhex nool yihiin, taas oo sababta khilaaf aad u weyn oo mararka qaar kara in naf lagu waayo oo dhimasho dhacdo. Dhacdooyinka sida weyn u taabtay dadka la hayb-sooco, waxa ugu weyn guurka taasoo keenta khatar amni, mid naf iyo maal ba leh tusaale ahaan, laba qof oo ka soo[3] kala jeeda beelaha la hayb-sooco iyo beelaha kale oo iska guursada waxa ay keentaa khataro fara badan oo ay ka mid yihiin dhaawacyo khatar ah oo kasoo gaadhay guurka ay is guursadeen laba qof oo dhinac aaminsanyahay inay kala sharaf iyo sumcad wanaagsan yihiin, labada dhinac ee is guursaday, waana sababta ay mar kasta oo sidani dhacdo lagu sii talo galo dhibka ay wadato in ay is guursadaan laba dhinac oo marka hore mid ahaan lagu hayay hayb-sooc baaxad weyn oo gaadhsiisan inaanay fiicnayn guurka dadka la hayb-soocaa, waxaana sababta ugu weyni tahay soomaalida oo aaminsan in la kala sharaf iyo sumcad wacan yahay , waana sababta mar kasta keenta in la arko tacadi uu sababay guur laba dhinac oo mid ahaani wado arimo uu ku fashilinayo guurka aan la ogolayn ee dhaqanka soo jireenka ah laga dhaxlay awoow illaa awoow illaa haatana ka jira gayi kasta oo ay soomaali ku nooshay waxaana laga dhaxlaa kala qeybsanaan bulshada dhexdeeda ah oo uu dhaqanku sabab u yahay.

SABABAHA KEENAY HAYB-SOOCA

Sababaha keena hayb-sooca ka dhanka ah beelahan la hayb-sooco, waa dhibaatooyin dhaqan dhaqaale oo kuwo xidhiidhsan oo salka ku haya dhaqanka soomaalida, taasna waxa ka gaabiyay bulshada looga qaateen ka ah ee isugu jira aqoonyahan, culimo, iyo dhalinyaro oo aan door weyn oo bulshada dhexdeeda ah aan ku lahayn ka wacyigalinta dhibaatada lagu hayo bulshada la hayb-sooco, taasina keentay inuu sii socdo hayb-sooca iyo dhibta lagu hayo bulshadan, sida is daba jooga ahna u sii soconaysa illaa wakhtigan la joogana xal waara lagama gaadhin hayb-sooca muddada intaas le'eg soo socday. Tacadiyada ka dhanka ah hayb-sooca sida, aflagaada, xaqiraada, sumcad dilka waxa keenay is badal la'aanta dhaqanka soomaalida oo aan wax iska badalay aanu jirin, bulshada la hayb-soocaana waa bulsho farsamo yaqaan ah oo ku hawlan nolol maalmeedkooda sidii ay ulla soo bixi lahaayeen, tanina waxay qeyb ka tahay inuu sii socdo takoorka iyo hayb-sooca ka dhanka ah dadkan la hayb-soocayaa.

Waxa kale oo jira hanaan cadaaladeed oo ku salaysan tacadiyada ka dhanka ah hayb-sooca .oo loo maro habka uu jideeyay dhaqanku, hase ahaatee kuma filna in hanaankasi uu wax ka taro cadaalad darrada lagu hayo dadka la hayb-sooco. Xeer dhaqameedku waxa uu ku hayaa cadaalad daro aad u baaxad weyn waxaanu meesha ka saarayaa xuquuqaha aasaasiga ah ee leeyihiin ummada la hayb-soocay, xeer dhaqameedku waxa uu kala saraysiinayaa ummadaha kuwada nool hal meel taasoo uu qaar ka dhigay kuwo leh darajo sare, qaarna darajo aad u hoosaysaa, taasina waxay cadeyn u tahay faquuqa iyo hayb- sooca uu xeer dhaqameedku ku hayo beelaha la hayb-sooco, cadaalad darro baaxad weyna way ku tahay taasi.

Xuquuqda ay u leeyihiin inay helaan dadka la hayb-soocaa inay helaan ee ay ka

3 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb Sooco

mid ka tahay magdhaw cid kasta oo ku kacday falal hayb-sooc oo kala fogaynaya. Tusaale ahaan, laba qof oo is guursaday iska daa inay xuquuq helaane waxay kala kulmaan tacadi jidh iyo mid maskaxeed oo salka ku haya xeer dhaqameedka kala saraysiiyay dadka la hayb-sooco iyo kuwa hayb-sooca ku kaca.

Waxaynu tusaale u soo qaadanaynaa dhibane ka mid ah bulshada la hayb-sooco marka ay guursadaan cid aan ahayn haybta ay ka soo jeedaan. Mustafe jaamac, 29 jir, Waxaa dhacday inuu ka doonto qoys ka mid ah qoysaska aaminsan inay dadka la hayb-sooco guurkoodu yahay mid aan wanaagsanayn, Mustafe waxa wehelinayay odayaashiisii markii la wada fadhiistay ee la iska waraysay reeraha uu ka soo jeedo inanku waxa loogu jawaabay inaanay kala guursan labadas reer ka dibna way iska soo noqdeen reerkii Mustafe, muddo kadib waxa dhacday inay isla baxsadaan inankii iyo inantii si qarsoodi ahna isku guursadaan, kadib waxa la dayriyay gabadhii markii la ogaaday arrinka qarsoodiga ah dibna ugumay noqon reerkoodii waxaanay xisaaban tahay inaanay ka mid ahayn reerkii dhalay ee ay ka soo jeeday maadaamay ay guursatay nin kasoo jeeda beelaha la hayb-sooco . Mustafe Jaamac wuxuu ka qeyb qaatay su'aalaha tooska ah waxaanu degen yahay xaafada Daami ee magaalada Hargeysa.

Yuusuf Geedi waa 25 jir, waxa ay is guursadeen gabadh ka soo jeeda reeraha la hayb-sooco, waxay kala kulmeen guurkooda tacadiyo fara badan oo ay ka mid ahaayeen in gabadha laga soo rido uur ay u qaaday saygeeda maadaama marar badan laga hor istaagay inay is guursadaan iyada oo la aaminsanaa inaanay u qalmin ninkan kasoo jeeda beelaha la hayb-sooco, sharafta iyo karaamada reerka ay gabadhu ka soo jeedana ay nusqaan ku tahay inay dhasho ilmo uu aabe u yahay nin ka soo jeeda beelaha la hayb-soocaa.[4]

Waxaa jirtay in gabadhii laga soo kaxaystay ninka ay qarsoodiga isku guursadeen sababta ka dambaysaana ay tahay inaanay is guursan karin dadka la hayb-sooco iyo reerka ay ka soo jeedo gabadhu, waxaanay tacadi joogto oo jidh iyo maskax ah ku wadeen gabadhooda.

Waxaa kale oo dil loogu hanjabay Yuusuf Geedi haddii mar dambe ku soo dhiirado inantooda laguna dili doono haddii mar dambe uu inantooda u soo hanqal taago, cid wax ka weydiinaysaana aanay jirin. Taasoo macnaheedu tahay in aanay wax qiimo ah oo ay leedahay in ay nafta dhaafiyaan. Marar badan waxa uu ka dacwooday haayadaha ay khusayso si wax looga qabto arrinkiisa balse, wax loo qabtay ma jirto aakhirkiina waxa saas ku soo dhamaaday rajadii uu ka qabay inay xaaskiisa noqoto gabadhaasi sidaasayna ku soo dhammaatay riyadiisii uu ka lahaa gabadha waxaanu eersaday dhaqanka kala saraysiiyay isaga iyo gabadhiisa ay is jeclaayeen. waxaa marar badan arrinkan galay odayaal kasoo jeeda beeshiisa oo ay ku jiraan madax dhaqameed, hase ahaatee, markii ay la kulmeen odayaasha dhinaca gabadha waxay ugu jawaabeen dhaqanku inaanu ogolayn guurka beelaha la hayb-sooco, Yuusuf geedi, waxa uu ka qeyb qaatay su'laaha tooska ah waxaanu degen yahay xaafada Daami.

Hadaba caqabada guurka waxay salka ku haysaa dhaqanka oo ah midka hoos u dhigay ee xaqiray beelaha la hayb-sooco kana hor taagan inay is guursadaan laba qof oo kasta oo kasoo kala jeeda beelaha la hayb-sooco iyo beelaha kale ee ay isku deegaanka degen yihiin.

4 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb Sooco

Sidaas darteed, in aan la ogolayn guurkooda waxa saldhig u ah dhaqanka, waxaanu wiiqayaa isla markaa kalsooni daro ku ridayaa in damac guur isku qabto laba qof oo kasta oo rabitaankooda iyo hamigoodu yahay guur, suuragalna maaha inay reer wada samaystaan oo ay xasilooni iyo nolol farxad badan oo sida qoysaska kale ee isku beesha kasoo jeeda u wada noolaadaan .

Waxa kale oo marag ma doon ah, inaanay jirin xeerer iyo qodobo ilaalinaya in loo ogolaado beelaha la hayb-soco inay guursadaan dhigooda beelaha ay isku deegaanka yihiin baahi weyn ka jirtana ay tahay in la arko mar uun dadkan isku deegaanka ah oo is guursanaya, wada farxaya nolol qiimo badan iyo xasilooni kuwada nool cid dhibaataynasa oo soo faragashanaysa noloshooda aanay jirin.[5]

Sheekh Najax Xuseen Xariir oo an ka waraystay arimahan xog ogaalna ka yahay, waxa uu ii sheegay inuu dhaqanku yahay dhibta ugu weyn ee jirta, isla markaana isku diidaya inay kala guursadaan beelaha la hayb-sooco iyo kuwa kale, ay aad u adag tahayna in laga wada gaadho xal, kulamo badan oo ka qeyb galay oo lagaga wada hadlayay sidii loo joojin lahaa tacadiga ka dhanka ah guurka aan loo heyn siyaasad lagu hago dhibta ugu weyn ee jirtaana ay tahay dhaqanka, oo laga aaminsanyahay inuu yahay wax sax ah oo aanay aheyn in la ogolaado guurka beelaha la hayb-sooco lagana guursado loona guuriyo, waxa kale oo nooga waramay dacdooyin badan oo ka dhacay wadanka Somaliland, oo dhamaantood ahaa guur fashilmay oo aan lagu guulaysan in la yagleelo qoysas ka soo kala jeeda labada beelood ee ah kuwa la hayb-sooco iyo beelaha kale ee ay wada degen yihiin deegaanka isku midka ah .

Waxaa sidaas oo kale aan wax ka waydiiyay, Garyaqaan Maxamed Jaamac Ibraahim oo ah qareen isla markaan sannado badan ku dhex jiray mihnada sharciga oo degen magaalada Hargeysa, arrimaha salka u ah inay beelaha la hayb-soocaa ka guursadaan beelaha kale, waxa uu ii sheegay inay tahay xeer dhaqameed soo jireen ah oo isku diidan inay ay beelaha la hayb- soocaa kala guursadaan beelaha kale ee ay wada degaan isla markaana uu arkay dhacdooyin tiro badan intii uu ku dhex jiray mihnada sharciga iyo maxkamadaha; sababta ugu wayna ay tahay ta xeer dhaqameedka oo ah ka isku diidan in laga guursado ama ay ka guursadaan dadka la hayb- sooco.

Sh. Mukhtaar Cabdilaahi Raygal, oo ka mid ahaa 14 qof oo aan wax ka weydiiyay arrimahan waxa uu ii sheegay inaanay ogolayn diinta islaamku in la isku diido laba qof oo Muslim ah isla markaan ku heshiiyay inay is guursadaan, ee ay tahay dhaqamo aad u xun oo qiil looga dhigayo isla markaana lagu hor istaagay, diinta islaamka ee sharafta mudana aanay diidanayn inay is guursadaan oo ay reer wada yeeshaan laba qof oo is doortay kuna heshiiyay inay seeska u taagaan qoys islaam, loomana adkaysan karo in lagu dhaqmayo waxaanay xaaraan ka dhigayn diinta islaamka ee sharafta mudan.

5 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb Sooco

TALLO SOO JEEDIN

1. U qoondeyn dhaqaale

Waxaa aad muhiim u ah in la kobciyo dhaqaalaha beelaha la hayb-sooco oo aad u liita, haddaba si looga hor tago hayb-sooca salka ku haya xeer dhaqameedka bulshadana la fahamsiiyo inay ummaddu u siman tahay leedahayna xaq isku mid ah, dhinac kasta oo nolosha ka mid ah.

Si looga koro xeer dhaqameedka aan waafaqsanayn diinta Islaamka maadaama dadka la hayb- soocayaa ay yihiiin muslim bulshadana ay ka mid yihiin.

WACYIGELINTA BULSHADA

In kor loo qaado wacyiga bulshada ee dhanka tacadiyada salka ku haysa dhaqanka, isla markaana la kobciyo xuquuqaha ay ku dhex leeyihiin bulshada dadka la hayb-soocaa, isla markaana la helo u adeegayaal xuquuqda aadamaha si looga baxo hayb-sooca

2. Helista Macluumaadka tacadiyada hayb-sooca

Waxa lagama maarmaan ah, in la helo macluumaadyada iyo cilmi-baadhis rasmi ah oo ku saaabsan tacadiga hayb-sooca iyo xaqiiqooyin daaha ka qaadaya tacadiyada hayb-sooca ee dhaca iyo baahida loo qabo in laga baxo tacadiga lagu hayb-soocayo bulshada qeybo ka mid ah, isla markaana dawladu u qoondayso maaliyad lagu baadi goobayo xogta tacadiga hayb-sooca

3. Xoojinta sharciga iyo Nidaamka Cadaalada

In la helo, Xeerar iyo siyaasad xaqiiq ah oo wax ka qabanaysa tacadiga hayb-sooca ee ka jira wadanka, si looga waantoobo tacadiga beelahan lagula kaco ee ku salaysan dhaqanka.

Si ay kalsooni dheeraad ah u helaan dadka la hayb-sooco ee u nugul dhibaatoyinka tacadiyada guurka kaga yimaada ee dhibta badan ku haya xaqa ay u leeyihiin inay helaan guur, si ay u timaado cadaalad buuxda oo ka turjumaysa xoojinta iyo nidaamka cadaaladeed ee guurka.

4. Aasaasida u doodayaal si loo af jaro tacadiga ku salaysan hayb-sooca

Waa in la aasaasaa Gudiyo isugu jira culimo, aqoonyahan, odayaal iyo bulshada qeybeheeda kala duwan si ay uga hawl galaan suulinta/baabiinta tacadiyada guurka ee ka dhanka ah dadka la hayb-sooco, si ay u shaaciyaan unna lafa guraan tacadiyada ka dhanka ah hayb-sooca iyaga oo dhinacyo kala duwan ka eegaya xaqiiqda jirta ee hayb-sooca ka dhanka ah.[6]

5. Mideynta Tacadiyada ka dhanka ah Hayb-Sooca

Bulshada qaybeheeda kala duwani, inay adkeeyaan isla markaana xoojiyaan kana xaqiijiyaan inay ka dhab tahay baabiinta tacadiyada ka dhanka ah hayb-sooca, dhinacna ka wada istaagaan sidii loo soo af jari lahaa fikradaha ku aadan is badal dhab ah oo go'aan laga gaadhayo arrimaha bulshada la hayb-sooco ka heysta ` dhinac kasta oo ay tabanayaan.

6 EAJ Tacadiyada Ku dhaca Dadka la Hayb Sooco

GUNNAANAD

Cilmi-baadhistani, waxay soo bandhigtay xaqiiqda dhabta ah ee tacadiyada ka dhanka ah hayb- sooca, isla markaana ay sii badanayaan arrimaha ku saabsan tacadiga, dhaqanka, asluubta, akhlaaqda iyo anshaxa guud ee aadanaaha ka dheer ka qeyb qaatayaashii cilmi baadhistani waxay sheegeen halka uu taagan yahay tacadiga lagula kaco dadka la hayb-sooco iyaga oo hoosta ka xariiqay inay biyo kama dhibcaan tahay inay jirto dhibta lagu hayo iyaga oo ka waramay sida loo dhibaateyo dadka la hayb-sooco, sida kuwa lagu wiiqayo is dhexgalka bulshada isla markaana la isku xaqirayo/ hoosna loogu dhigayo dadka la hayb-sooco. Macnaha dhabta ah ee ka dambeeya cilmi-baadhistani waa in kor loogu qaado lanna fahmo dhibta ay leedahay hayb-sooca lagula kacayo dadkan la hayb-soocaa, isla markaana la helo sharciyo baabiinaya hayb-sooca gabi ahaanba, bulshadan sinaan iyo cadaalad u hor kacaya, sidaas oo kale, in la helo siyaasado lagula tacaalayo hayb-sooca oo wiiqaya dhibta uu leeyahay hayb-soocu. waxa kale oo muhiim ah, in la helo qorshe lagaga hortagayo laguna baabiinayo tacadiga hayb-sooca ee jahliga ku salaysan, waa in la xoojiyaa hay'adaha ay khusayso ka hor taga babiinta hayb-sooca si looga waantoobo hayb-sooc gabi ahaanba awooda iyo tamartana lagu mideeyaa hanaan kasta oo lagula tacaalayo oo lagu baabiinayo hayb-sooca jaahilnimada salka ku haya, dawladuna iyo bulshada inteeda kaleba ay iska kaashadaan sidii meesha looga saari lahaa hayb-sooca waqtiyadii jaahilnimada lagula kici jiray ee ka dhanka ah hayb-sooc.

Tixraac

1. Cabdi Madar, X. (n.d.). Buuga Hiil.

2. Ismail Ali, M. (n.d.). Buugga Dirsooc.

3. Minority Rights Group International. (2020). World Directory of Minorities (Tusaha aduunka ee dadka laga tirada badan yahay): Gabooye. The United States Department of Justice. https://www.justice.gov/sites/default/files/eoir/legacy/2014/02/19/Gabooye.pdf

4. Organisation suisse d'aide aux réfugiés (OSAR). (2018, July). Somalie : le groupe minoritaire des Gabooye/Midgan (Soomaaliya: Dadka Gabooye/Midgaan). OSAR. https://www.ecoi.net/en/file/local/2018036/180702-som-gabooye-fr.pdf

Maxamuud Saleeban Cabdillaahi (Mohamoud Suleiman Abdilahi) waxa uu haystaa shahaadada koowaad ee jaamacadda ee kulliyadda sharciga ee Jaamacadda Hargeysa. Wuxuu ku tabar qaataa sharciga magaalada Hargeysa, Somaliland, wuxuuna ka helay xaquuqul insaanka iyo tababar sharciyeed xafiiska qaramada midoobey u qaabilsan daroogada iyo dambiyada, Ururka Caalamiga ee Socdaalka, Golaha Qaxootiga Norwey, iyo Caritas Switzerland.

Tirsiga 1
Juulaay 2020

TACADIYADA KU DHACA DADKA LA HAYB-SOOCO

Maxamuud Saleeban Cabdillaahi

EXPANDING ACCESS TO JUSTICE

Balaadhinta Adeegyada Marin-Uhelida Cadaalada
Taxanaha Daraasadda Aqoonyahannada EAJ

USAID KA TIMID DADWAYNAHA MARAYKANKA
BALAADHINTA ADEEGYADA MARIN-UHELIDA CADAALADA
pact building local promise.
ABA AMERICAN BAR ASSOCIATION Rule of Law Initiative